

Cabdi iidaan

Gabaygan waxa abwaanku tirshey habeenkii Calan- saarka.

Ayadoo abwaanno badani oo Timacadde ka mid yahay ay
habeenka goobjoog ahaayeen, gabaygan wuxu Cabdi ku qaatay
kaalinta kowaad.

Geeraar baan awalkiisiyo

Anbaduu ka bilaabmiyo

Halka uu ku idlaadiyo

Sida loogu shaadiyo

Aakhirkiisa hayaaye

Indhaweyd iska daayee

Akhyaartiinan Golaa

bal maydiin akhriyaa

Eray wayga Salaan

Erayna wayga duco

Halna waa ururkeenna

Erayna waa Calanka

Eray wayga salaane

Waa araarad maqnaynnoo

Waa ashqaalo magaaloo
Ammint anaannu haleelnee
Ereygawgu horreeya
A- Salaamu- Calaykum

Erayna wayga duco
I laahow ururkeenna
Inta loo denbi dhaafee
Ummaddii Nebigiiyee (NNKH)
Ehlul- Khayra ka yeel

I laahow arligeennana
Mid ammaan lagu joogoon
Abaar oobin ka yeel

I laahow aduunkeennana
Mid ibtiisa la maaloo
intifaacleh ka yeel

I laahow Oodda dhexdeenana
Soomaaloo idilkeeda
Midday uurka ku hayso
Mid I laah ka daweeeyoo
La I lloobo ka yeel

I laahoow eraygaygana

Mid aammiin la yidhaahdoo

La aj iibo ka yeel

I laahow udubkeenna

I stiqlaalka la siiyey

Afarteenaa bahoodde

Hareer aa kaga oodan

I su keen wada keenoo

Mid adkaada ka yeel

Erayna waa Calankeenna

Uumigii milicdii iyo

Asqadii dhaxantii iyo

Afduubkii xadhiggii iyo

Adduunkii lacagtii iyo

I bti looyin kaleetii iyo

Eed wixii nagu gaadhay

Adaan kaaga qabawnayoo

Kolkii uu araggaagu

I iftiinkii ugu deeqayba

Axdabtii? laga raystayoo

Dad aqoon daran miihinoo

Maanta meel laga ooyiyo

Oheey way iyo ciil iyo

Uurku- taallo ma joognoo

I laahbaa mahaddaa leh

Oo abaal loogu qabaa

NFD- ii ninka j oogiyo

Kan Amxaar adu laysiyo

Obokh meel la yidhaahdiyo

Labadaa ku arkaaya

Sidii Aaranka geeloo

Inta uu ul ku goosmay

Intaad oo ho tiidhaahdo

Ururiyoo dul sudhnaw oo

Isticmaarka fogeeyoo

Ardigaaga xoreeyoo

Insha- Allaahu hagaagoo

Adkaw oo ha nuqsaminoo

Ishii Cawri taqaanniyo

Kuwa uurka dabaayiyo

Afka layska habaaro

I Laahay idamkii

Kuma soo ag maraan

Albaqraa iyo Weyluniyo

Arbacuunka Qur'aankiyo

I daajaa kugu deyr ey

Halna waa ummadeennee

urur show urur shoow iyo

Ma kii loo irkaadaa iyo
Waa kan kii araggiisa
Indhuu noogu baxeen iyo
Alloow yaan ka fogaaniyo
Intanba yawga dhawaadiyo
Yaa agtiisa ku waariyo
Oggolaannay dhahaaya oo
Amranaa ku xigsiiyoo
Qof walooba agtaadiyo
Aqalkaaga hortiiisa
Albaabkaaga ku joojiyoo
Ilaaliyoo ha ka jeesan

Gabaygani wuxu isla abwaanku ka tirshay Khayriyada
Hargeysa habeenkii Calansaar ka wuxuuna ka mid ahaa
murtidii uu habeenkaa Abwaanku ku mutaystay KAALI NTA KOOWAAD.
Digniin: Gabaygu ma dhamma mana saxna Caj ladda aan ka
qoray oo tayadeedu liidatay darteed:

Isticmaar wax badan baan ku jirey lay addoonsado'e
Waagay Eebada qaybiyeen eedda laga boodey?
Ayaankaa la kala roonyihiyo ubadka xoolaaye
Innagaa Allaylehe ka dhigan awliyo kale'e
Dadba Midaannu kaga aar sannoo aayalaad tahay
Durba waadigaa nagu anfacy aammin nabadeede
Amley iyo warii qarinay iyo agabtii shaydaanne

Ayaant uu Qiyaamuhu dhacee Suurt a la afuufo

.....

Allayliyo allaylehe malaa adiga weeyaane

NFD- ii kuwii j oohey iyo kuwii in uga baalleeyey

Alambaqa kuwii lagu ridee Uubta lagu hooyey

Iyo kaa ifka u soo baxee maanta ku arkaaya

Iyo kii Qurbaha ku anbadiyo odayadii raagey

I dilkoodba adigawga dhigan Aabbe iyo Wile

Insha- Allaahu Soomaali waad ururin doontaa

Boqorkayow Dib Ulaabo

Cabdi Iidaan Faarax Nuur,

Cabdi Iidaan wuxuu Alla ha u naxariistee rishey tixdan

mar si xaqdarro ah ay u xidhadhay Dawladii Musuqmaasuqa

ahayd ee Doxorkii Afweyne ka horreysey. Waxa Cabdi la yidhi

waa inaad soo qorat aa arki si la idiin cafiyo. Cabdi wuxu

go'aansaday inuu Arji qorto balse aanu aadane ku hagaajine

Eebbe kaga dalbado waxa uu doonayo. Waa gabay aad ka dhadhansanayso

Muwaxidnimada Cabdi iidaan iyo islaamnimadiisa qotoda dheer.

Ilaahay u naxariisaygu wuxu yiri;

I laahaan baahannee loo baahanyow Boqor kayow Hee Dheh

I laaha weligi baaqiga noqdoow Boqor kayoow Hee Dheh

I aaha Deeqsinnimo loo baxshoow Boqor kayoow Hee Dheh

I laahi Waaxidnimo loo bart oow Boqor kayoow Hee Dheh

I laahaan xaq lagu beeninnoow Boqor kayoow Hee Dheh

I laaha dunida baar axa khalqoow Boqor kayoow Hee Dheh

I laahii inu bur bur in sheegayoow Boqor kayoow Hee Dheh

Bini'Aadmi waa meel sokee Boqor kayoow Hee Dheh

Bismillaahi waa culust ahee Boqor kayoow Hee Dheh

I laahii Dart ii lagu beryoow Boqor kayoow Hee Dheh

Kolka Bacadka yoomkiyo la t ago belel Qiyaamaa

Ninkast oo Badraanihi mar kuu biidna t ari waayo

I laaha Xukunka keligii bogt oow Boqor kayoow Hee Dheh

Bar Janno iyo Cadaabt uu khalqiga ugu bushaar eeeyey

Badhba meelu geeyoba mar kuu kala boqoolsiiyo

I laahii laba u kala baydhiyoow Boqor kayoow Hee Dheh

Bidhaant ii kast aba kii ar koow Boqor kayoow Hee Dheh

Bad wax mar a berriga waxa j iriyo buur o dabadooda

I n bogliyo in baabaca dhigt iyo baalka lagu duulo

Bushimo nool Allaha quudiyooow Boqor kayoow Heedhe

Biyo Oday int uu iga khalqiyo biliq yar oo Dhiiga
Bilcan Dumar a uur keed int uu igu bar waaqeeeyey
Bar na aniga oon qabin isagaan igu bukaysiinnin
I laaha Nolosha igu soo baxshoow Boqor kayoow Hee Dheh

Baabaca addoon baan dhigt ee Boqor kayoow Heedhe
Boqolkaaga magac ee mid la' yaan baaqa maqashiinne
Allow xadhiga sahal iiga bixi kuu baryoot amaye

Markii la sii daayey Cabdi iidaan ayaa ninkii Xabsiyada
hayst ay oo Xasan Cabdi Khayre la yidhaahdaa " Waat aa lagu
sii daayey ee maant ana maxaad odhan lahayd". Markaas ayuu
gabaygan kale ee qot oda dheer tiriyey;

Mar wax- bixiye bini- aadmibaa lagu maleeyaaye
Adigaan qasnadahaagu madhan oo mahade buuxaane
Adiguu ku soo magan- galaa ruux madluumahiye

Kol haddii Miciinoow la yidhi meel kalaan jirinne
Maqribkay cadceedu u dhacdiyo muuqashada Waaga
Madowgiyo Iftiinka is beddela maalin iyo habeenka

Madhabti Qur'aankaan bartiyo Maxamed Jaahiisa??
Iyo magaca weynee Carshiga yaan miskaansadaye
Haddana sacabbadaydii madhnaa meesha soo dhigaye
Maantana ilaahow i furo kuu martaan ahaye

IABADEENA DEGAL Dib U laabo

Cabdi Iidaan:

Cabdi Iidaan Faarax (Ilaah ha u naxariistee) wuxu ahaa abwaan weyn oo magac iyo mansabba ku lahaa maansada mugga weyn ee Soomaalida.

Gabaygan oo ka mid ah kuwa fara-ku-tiriska ah ee Cabdi ka tirshey Qabiilka waxa uu abwaanku u tirshey Abwaankii weynaa ee Qawdhan Ducaale. Qawdhan Ducaale oo da' ah iyo Cabdi oo dhalinyaro ah gabaygana bilaabay ayaa waxa colloobey labadii Juffo ee ay ka soojeedeen. Colaaddaas oo koobnayd waqtigeeduna yaraa wixii lagu heshiiyey u cuntamri waayeen Qawdhan Ducaale oo isagu soo gaadhay horraantii 1950-meeyadii.

Qawdhan wuxu tirshey gabay aannaan wax badan ka hayn balse ay tuducyadiisa ka mid ahaayeen;

Gobannimo la iibsaday sidii weden la gooshaashay?

Cabdiyoow ninkii gaabsadaa iima soo galo'e

Kol hadday go'domeen raggaan garabka saaraayey

Gujolaguma faanee haddaanaan geydha soo celinnin

Gebagebaha haddaan reer Xuseen goosan ka hungoobin?

Cabdi iidaan intuu u tegey buu Qawdhan weydiyey inuu gabayga

tirshey taasoo uu u xaqiijiyey. Cabdi oo nin Ciidagale ah

isugu sheegay Qawdhan ayaa yidhi "Nimankii Arab way soogabyeen
oo waxay yidhaahdeen";

Waayahanba dawlaabta gabay kuma dedaalayne
In dhaweyd dan baan uga baxoo kuma dannuukhyayne
Dabshidka iyo waa laba habeen Dirirka- Cawleede

Danbar samaha iyo Naafku waa kala danbeeyaane
Daruuraha cirkuna maalin bay di'itin maagaane
Xaluunbaan dawaarka urogoo daaqadaa furaye
Bal an dayo denbina wuu gala laguna deyn waaye

Meeshiyo Duray iyo halkiyo duudki nebi aadan
Dariiqada Islaamka iyo sidii dunida loojoojey
Dunta Maxamed iyo Ciidagale waa is dilayeene

Weligoodba labadeennan degel Daawo ma lahayne
Haddaannaan dacar qadhaadh idinku noqon nalama daayeene
Dadka wixii ku sooraaci kara daan walba u qayli

Inta cagaha lagu daaliyiyo doono ba Xawaadle
Diraac curat aay roobkoo onkodey doogga naga waabi
Geerida wax kaa daaficiyo diricyo soo qaado

Ducaaliyo Warsame Gaanji iyo Diiriye u yeedho
Dalbo Aabbahaa baa ka iman daarta aakhir o'e

Maantaba Dayuurado ka kici dooxan gudihiisa

Qawdhan Ducaale markuu gartay in Cabdi gabayga tirshey ayuu yidhi;

"Adeer waad gabyaysaaye, gabayga Cayda ka ilaali"

Diigaa Dib Ulaabo

Abwaan Cabdi Iidaan Faarax hal-abuurka maansada Somaliland safka hore ayuu kaga jiray laahay haw naxariistee. Habeenkii Xornimadii 60kii abwaanku wuxuu helay kaalinta koobaad marka la eego gabaydii la marayay markii la saarayay calankii Somaliyeed ee ugu horeeyay. Waxa gabayo lama ilaawaan aha goobta ka tiriyay Axmad Ismaaciil Diriye Qaasin iyo Cabdilaahi Suldaan Timacadde. Naftiisii wuxuu ku waayay maansooyin isdabaj oog ah oo uu ka tiriyay xukunkii kaligii taliska ahaa ee dhaawaca weyn u gaystay dalka iyo dadka Somaliland. Halkan ayaad ka akhrisan kartaa Deeleeey iyo Shiinleey uu abwaanku ku farayaystay. Abwaanka waxa igu maqaallo ah inuu jacayl bestii la ahaa markuu midhaha heesahan curinaayay, nasiib darana waxa ahayd isaga oon ku guulaysan, ama jacylkiisii aanu midho dhalin. Si kastaba ha ahaatee, abwaanku midho dhaxal galeena ayuu uga tagay dhammaan dadka afka-Somalilaga ku hadla. Heestan magaceeda waxa la yidhaa "Diigga Habeenkii", waxaana ku luuqeeya fanaanka weyn Maxamad Axmad Kuluc.

Heestu waxay ku bilaabmatay sidan,

Diiggaa habeenkiyo
marku waagu daalaco.
Dumaraw aad ugsoont oo.
Dayaxoo badh kaa maqan
Dabuubta ugu yeedhaa

Diinkuna madhuunyadoo
Dar eemada abaartii
afka uu diidaa
halku g'ugii ku daaqee.

Ana dookhu yaab lee
sidu iigu kaa diray
Dawoy adiga mooyee
Dumar kale ma eege.

dan kaama le taa dhaaf
Waa doqone haw jabin
Dar baa igu yidhaahdee.

Ama dir aadiraalaa
dadka kaa xanaaqee
uunka kugu colaadshaan
inta daaya leeye.

Baydka Labbaad

Daya awr ka geeluba
wuxu micida duugaa
dayrta iyo g'uguu
isba dayr cadkiisuu
Sheeda uga doobyaa.

Marku daalo xiisaa
wuu kalii dawaafaa
darba samada cawshu
daruur ahaa ka faashaa

Ana dookhu yaab lee
sidu iigu kaa diray
dawoy adiga mooyee
dumar kale ma eegee

dan kaama le taa dhaaf
Waa doqone haw jabin
Dar baa igu yidhaahdee.

Ama dir aadiraalaa
dadka kaa xanaaqee
uunka kugu colaadshaan
inta daaya leeye.

Deeley

Dib U laabo

Cabdi Iidaan Faarax

Gabaygani wuxuu ka mid ahaa Silsilad la magac baxday Deeleeey oo falanqaynaysay xuukunkii faqasht a ahaa ee dalkaa waagaa ka talin jiray. Wuxuu gabayga abwaanku curiyay Alla haw naxariisto eh sanadkii 1980, maansdad inteeda badan wuxuu u jawaabayay nin faqash ahaa oo la odhan jiray Cali Cilmi Afyare. Dadka qaar kood waxay ay qabaan in Cabdi Iidaan xunkuku uu u dilay gabaydan daraadood.

Wuxuu Yidhi:

Deelleey dareenleey

Rag Alloow ma dooxaa

Ma dillaaciyaa nabar

Daboow duur galoo olol

Adiguna Digooy gubo

Danba maw idhaahdaa

Habartii docdeediyo
degelkay ku noolayd
Daruuruhu ku hooreen
dadka wada hel mooddoo
Daad-wararac bay tidhi
misna talada kuma darin
inu duud abaariyo
Degel lagu harradiyo
Gobol lagu darleefiyo
darxumooyin muuqdaan
Dirqi-ku- noolu badan tahay
danyartiyo shaqaaluu
daasad garawa goyn karin
Inuu Duhur- Dalawgii
Debedaha u suudalay
dibjir kii ku maqan yahay
Waase Dumare yeelkeed

Dibigii Xareeddiyo
Dooxadu u buuxdee
Dinaahyeeyey ee ciyey
Isagiyo dibbiradii
Duuluulka Karantiyo
Dayrtiyo Jidhaamaha
Dareenkiisu kama foga

Lo'eey dabar go'aagii
Dabadheer abaartii
darii qyada wadhnaantii
Dawyada tubnaantii
Dabadeed dhulka u dhow
Duunyada u tabar- daran
Dumar seben barwaaqa ah
Subag kaa dudduuciyo
Nacasbaan ku deynine
Kaa durug nin fiicani

Afartaa dheh deelley
Dadkaa lagu habaaraa
Ducona waa u dhawdahay
Alla Ku Doorii waa maxay

Daadkor u socdaa jira
Durdur oomay baa jira
Dabar waashay baa jira
Dameer aaba Weyl dhalay
Sacabtimo ma laga deyey
Duqdi niri gti kama gudhin
Isku dununuc reentee
Daawad Gorofka yawculay
Suaashaasi dawga ah
Danyar cabashadeeda ah

Dulmanaha war kiisa ah
Kacaankana Dansheegiyo
Dawya u tilmaanka ah
Duqu yidhi abwaannada
Dar eenkiina soo dhiga
Diqsi ur ur ay baad tiin
Nin deggani ma odhan karo
Duuf laalse mooyaan
Dirxiguba dantiisuu
Qudhunka u dabbaashaa
Waxa taa la derejo ah
ninka soorta duufka ah
dadku nacay isagu cunay
dar dar saday Fandhaallada
Anigaa dushaydiyo
war ma danana iyo seef
Dunj igayga lala dhacay
Doofaarka ficil li'i
Naar loogu daayimi
Horta maan dagaallamo
Duqa yidhi ma maqasheen

Dul- ka- muummin baa tahay
Uur- ka- Daallin baa tahay
Dibno Kacaana baa tahay
Isha bidixna kuu daban

Dalba- Juuqahaaguna
Wax la dedo ka xeel dheer
Allow yaa ku dooxoo
Haddana aan ku dilinoo
Waxaad damacsant ee kale
Debedda ula soo baxa

Afartaa dheh Deelleey
Dabray oo ka jeedladay
waxan uga danlee yahay
Dadka reer Jabout ee
Dawladnimada tooda ah
Cidna aan iskaga darin
Waa deris walaalkaya
Dugsi weeye gacalnimo
Anigu waan ku diirsaday
Lama dira- diraalayn
Ha daar daarin waa gobe
Aniguna ma diidani
Dugaagbaa ku shiray meel
Daawana way lahaayeen
Hal dubaaxa buu helay
Waraabii dedaalkiyo
Duqa weyn isaga buri
Darriibtii u wada dhigay
Waa kii Dawrigii Aar

Ku dellaley dhar baxada
I nuu dilose ma ahayn
Wuxu yidhi Dayooy hee
Adna Dogob qar oomee
I sku wada dar say tidhi
Wuxu yidhi Dayooy yaa
Daacadnimada kuu dhigay
Dacawadi waxay tidhi
isha Cali ninkii deyey
Digniin wawgu filan tahay
Dibna leef shariir hoo
Dufan jecel dheryaha kari
Diktoorka beena sheegtiyo
Afarrey ku daahiyo
Mid Ammaana doontiyo
Dir-cunnooy ha kala tegin
Adiguna Dameer oow
Dawankaaga qaadoo
Higso faraska Doolaal
Dani seeto weeyee
Daba soko ma gaadhide

Haddii gabayadii Dura
Salfudaydka lagu daray
Degdegsiinyo weeyee
Midka daran ma sheegnaa

Dar banoow Ast aadkii
Seyidkii Daraawiish
Kula diriray gaalada
Dar Allee habaarkii
Labaduu is daba dhigay
Dalka yidhi idiin tali
bal dar may ahaayeen
Anuu daaha kama rogin
dadkuse waa yaqaannaa

Dabbaal barad caruuriyo
Dhalinyaradu daashaye
kolka daan- cirrooliyo
Raga madaxu Deeb yahay
Dirirta isu soo hadho
War ku daaqsin geel tago
Ninba maaxdi haw dego

Sheeg hadaad garato

Dib U laabo

Sheeg Hadaad Garat o

Cabdi Iidaan Faarax Nuur

Wuxu yidhi Cabdi Iidaan Faarax Alla ha u naxariist ee.

Kolkii Midhayarii wada shuq yidhi shidant ay Deelley'e

Shinbir_Dhar abtu meel Aar fadhiyo shuuqa kama deynne

Sha'diibaan hayaanka u rarnay iyo shaanbis geeddiga'e

Shaabuugga nadigaa tix- yar e sheexa ka lahaanne

Affarrey ha lala soo shirt ago Shoolla Booliyahe

Halkaasaa Sengaha noo sharraxan shaalka loo sudhaye

Shaf shaf aha duxda ah leefihii cid u shaqaynaayey

Iyo SHurunshur malaggiisu galay haysa soo shubo'e

Shilmaqabe tixdaan Gaarriyoow shiinka ka asteeyey

Ama Geenyadaan xalay shirrabay shalaw abraarkeeda

Meeshaan Shakamaddawgu xidhay sheeg haddaad garat o

Shafart a iyo dabaylaha jiraa shaamar eer ka lehe

Shifo waxan lahaynoo la cuno sheeg haddaad garat o

Shubaal quruxsan Gaawaha shaxshaxa Shuqul gobaadeedka

Shinni dhagax sideedii markuu noogu shiro geelu

Sharaan duhurki sharad kuugu galay, Laaska shacabkaasa

Inaan maantadani kuugu shubo ee shifo u hooda

Markay shaaxin ugu heesayaan kama shiddoodaane
Sharba uga ducee inaanu helin shil iyo qayrkiiye

Misana Sheekhyadii iyo u qabay Weliyo sheellaaye
Misna sharax Kit aab kama akhriyin Shed ay ku yaallaane
Waxa badawgu Sha'allaah u yidhi sheeg haddaad garat o
Shibba waxa dibnii looga dhigay shar iyo khayr daayey

Abwaan wuxu murtidi uga shakiyey sheeg haddaad garat o
Runtii shimiqda waxa looga dhigay una shareer naat ay
Ee ay beentu shaaraca ku timi sheeg haddaad garat o
Shirkii lagu ballamay faalladii shaaca laga qaaday

Shalmadi Koor e raacdoo waxbaan sheedda kaarkaaye
Shishe u aragnay haasaawihii shaadir ka lahaaye
Shaf-dhiggiisu meeshuu hirdiyey sheeg haddaad garat o
Belaayada shinkeed galay fidmada laga shaqaynaayo

Shoocaalligeedaa hirmacay waase sheen ga'anne
Halka shalaxda lala maaggan yahay sheeg haddaad garat o
Cadceedduba Dayaxa shiiqiisee waana laba shay'e
Wuxu Shamacba taaggii u huray sheeg haddaad garat o

Shafartii qabiilkiyo Wiglada lagu shanlaynaayo
Waxa qaranka shuushkii ka baxay dib ugu shaasheeyey
Duqdii oo Shakaalkii qabriga iyo shebeggi hayn waayey

Shaar uba Libaax iyo hadday Shaadh ammaan t olat ay
Shar cigi lagu qaban lahaa meelu j iro sheeg haddaad gar at o
Ninku kibirku shaanshaan ka ridey waaya shaxart aanye
Misna waxanu sheekada ku darin shiishka soo maqane

Inta Shaqalka gaabani u j iro sheeg haddaad gar at o
Shif u dhimo nin ragi waa geyaa sharafna noolow'e
Waxay Sharadi meesheed u tahay sheeg haddaad gar at o
Shilalka lagu qal neefkii la cuni Shidhada xoolaaye

Shanqadhiyo Shar iir yaha dighiga shagagaxdii weelka
Sidii Wananka loo kala shishlaa Shiillimaad noqoye
Shansho kama dhadhamin reerku waa shey cajaa'ibahe
Waxay sheeka- baraleeydu tahay sheeg haddaad gar at o

Shabeelkiyo Orgigu waa heshiis Shiibba?? dhega yaabka
Shilalkay isugu dhuumay ee nabaddu shuuxshuuxa
Shullo maran la dhigaybaa jirt ee sheeg haddaad gar at o
Shaxda niman aqoon lama degen mana shu'aysteene

Shan Soomali oo wada socdoo Calan ku sheekeeya
Shinmaa la arkayaa waa su'aal sharad ka yaallaaye

Hadaan Baadad Leeyahay

Dib U laabo

Abwaanka waxa igu maqaallo ah inuu j acayl best ii la ahaa
markuu midhaha heesahan curinaayay, nasiib darana waxa ahayd
isaga oon ku guulaysan, ama j acaylkiisii aanu midho dhalin.
Si kastaba ha ahaatee, abwaanku midho dhaxal galeena ayuu uga
tagay dhammaan dadka afka- Somalilaga ku hadla. Heestan magaceeda
waxa la yidhaa "Hadaan Baadad Leeyahay", waxaana ku luuqeeya
fanaanka weyn Maxamad Axmad Kuluc.

Heestu waxay ku bilaabmatay sidan,

Hadaan baaxad leeyahay

Bada soma jiidheen.

Hadaan baalal leeyahay

Bar i soma duuleen

Saw bilic haldhaaley

bartay ku nooshahay

kuma waa bariisteen

Alahayw cidi i bixii

Heet a soo dhameeya

Waxba Yaanan Xanaaqinee

Dib U laabo

Heest an magaceeda waxa la yidhaa "Waxba Yaan Xanaaqin",
waxaana ku luuqeeya fanaanka weyn Maxamad Axmad Kuluc.

Heest u waxay ku bilaabmat ay sidan,

Waxba yaan xanaaqin

Markaan soo xasuusto

Xaawalayda naagood

r agi wada xumayseen

Xiisaaha kal gacalkana.

adaan xaynka kuu sudhay

adaa godob xambaart ee

xidigaha cir kana qabo

kolay kugu xidhiidhshee

Heet a soo dhameeya